

**Amarka lamba. 144 rep.**

**Dhisidda Golaha Dalka ee Soomaaliya, ee ku xusan qod. 4 Bayanka Mabaadiidda Dastuuriga ee ku lifaaqan Heshiiska Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya.**

## **MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

### **MAAMULHA**

Marka uu arkay xeerka 8 Febbraayo 1950, lamba. 12;

Marka uu arkay dekereetada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga ee 31 MARSO 1950;

Marka uu Tixgaliyay in ay habboontahay in si deg-degga looga faaidaysto adeegsiga awoodahiis, talabixinta Golaha Dalka ee ku xusan qod. 4 ee Baaqa Mabaadiidda Dastuuriga ee ku lifaaqan Heshiiska Wasaayadda Talyaaniga ee Soomaaliya oo uu meelmariyay Golaha Guud ee Qaramada Midoobay kulankiisa 2 Disember 1950 ee Lake Sue.

Marka uu dhagaystay Golaha La-talinta Qaramada Midoobay ee Dalka ku hoos jira Maamulka Wasaayadda Talyaniga iyo xubnaha ka kooban dadka deegaanka, xisbiyada siyaasadeed iyo guddiyada jaaliyadaha shisheeyaha ee Dalka, iyadoo la raacayo qaabka u dagan ka kobnaanta iyo dhismaha Hay'adda iyada;

Marka uu arkay natiijooyinkii hawlaha lagu soo magacaabay guddiyada ee la qabtay 25 Oktoobar sanadka socda.

Isagoo Qaddarinaya awoodda la siiyay;

## **WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA**

### **Qod. 1**

Golaha Dalka ee Soomaaliya, ee ku xusan qod. 4 Bayanka Mabaadiidda Dastuuriga eek u lifaaqan Heshiiska Wasaayadda, ee sanadka 1951 wuxuu ka koobanyahay:

Cabdi Xaaji Yuusuf

Cabdi Nuur Sheikh Macalim

Cabdiraxmaan Cabdi

Cabduraxmaan Cali Ciise

Caddow Munye Cabdalle

Aadan Cabdulle Cusmaan

Axmed Faadil Hashaam

Cali Maxamed Bin Queer

Amin Maxamed

Boero Francesco

Boqor Muuse Yuusuf

Bona avv. Francesco

Ducaale Kaahiye

Falcone dott. Antonio

Gandolfo dott. Celestino

Xaaji Cabdullaahi Mursal Maxamed

Xaaji Cali Baalle

Xaaji Amin Sabar

Xaaji Xasan Axmed

Xaaji Maxamed Xuseen

Xaaji Ismaacil Yuusuf  
Xaaji Maxamed Xuseen Xaamud  
Xaaji Muuse Boqor  
Xaaji Saalax Sheikh Cumar  
Iimaan Cumar Cali  
Islow Mahadalle Maxamed Mahadalle  
Islow Cumar Cali  
Macalim Aaden Maxamed  
Macalim Xuseen  
Maxamed Caagane Cumar  
Maxamed Sheikh Cusman Cayle  
Cusmaan Xaaji Maxamed  
Sheikh Cabdullaahi Sheikh Maxamed  
Sheikh Cabdisalaam Suleymaan  
Shariif Saalax Bin Cumar

#### **Qod. 2**

Xubnaha Golaha Dalka laguma qaadi karo dacwad ciqaaba lamana xiri karo, iyadoo Maamulka aan oggolaasho laga haysan, marka laga reebo xaaladaha haddi la qabto iyagoo dambi faraha kula jira (flagaranza).

#### **Qod. 3**

Golaha Dalka waxaa shir-guddoominaya Maamulaha ama Xoghayaha Guud ama cidda ku xigta.

#### **Qod. 4**

Hawlaha Golaha dalka waxa lagu dhaqayaa nidaam hoosaad uu isla Goluhu soo jeediyo laguna fuliyo amar ku sii xiga.

#### **Qod. 5**

Si ku-meelgaara waxaa la isku xilsaaray qaybta II – LR. 1 ee miisaaniyadda A.F.I.S wixii la xariira hawlgallada sanad maaliyadeeka socda oo ah 10.000 sh. Somali oo lagu fulinayo hawlaha Golaha Dalka.

Muqdisho, 30 Disember 1950.

Maamulaha

**Forlani**